Qorshaha Biyaha Nadiifka ah

Sameynta maalgelinta saxda ah waqtiga saxda ah

King County
Department of Natural Resources and Parks
Wastewater Treatment Division

Biyaha nadiifka ah ayaa ka dhiga Waqooyi-galbeed meel gaar ah. Jeexa Puget Sound iyo harooyinkeenna, webiyada, iyo dooxooyinka ayaa waxaan ka helnaa cunto, gaadiid, shaqooyin, iyo maad.

Adeegyada biyaha nadiifka ah ee ay bixiso degmada King County ayaa waxaa ay ilaalinayeen tayada biyaha, caafimaadka dadweynaha, iyo deegaankeenna muddo tobanaan sano ah.

Waxaan ka shaqeynaynaa qorshaha dhammeystiran ee nidaamka biyaha wasakhda ee hagi doona shaqada Degmada muddo tobanaan sano ah. Qorshahan ayaa fursad u noqon doona wadahadal goboleed ku saabsan nidaamkeenna biyaha wasakhda iyo ilaalinta biyo-mareennada degaankeenna iyo caafimaadka mustaqbalka.

Waxaan si weyn u maalgelinaynaa biyo nadiif ah

Gobolkeenna waxaa uu leeyahay mashaariic iyo barnaamijyo badan oo ilaaliya tayada biyaha. Degmada King ayaa mas'uul ka ah nadiifinta biyaha ay dadku adeegsadaan ka-dibna ay dib ugu celiso dabeecadda. Biyaha wasakhda ah ee aan la daaweyn waxaa ku xanuunsada dadka waxaa ayna waxyeello u geystaan Puget Sound. Waxaan leenahay tuubbooyin dhererkooda gaaraya boqolaal mayl, bambooyinka biyaha, haamo, warshado biyaha daaweeya, iyo qalab kale oo qaada laguna daaweeyo biyaha wasakhda ah. Degmada King iyo dowlaha hoose ee kale ayaa waxaa ay mas'uul ka yihiin tas-hiilaadyada biyaha duufaanta ee tayada biyaha ka ilaaliya wasakhda ku jirta biyaha ku soo qulqula waddooyinka, meelaha gawaarida la dhigto, iyo dhulka kale ee malaasan. Hay'adaha dowladda iyo dowladaha hoose waxaa ay mas'uul ka yihiin barmaajiyada kale ee biyaha nadiifka ah.

Tobanaanka sano ee soo socda, gobolka waxaa uu ku bixin doonaa balaayiin doolar ilaalinta tayada biyaha. Degmada King waxaa ay qorsheynaysaa in ay ilaaliso oo ay sii wanaajiso nidaamka daaweynta biyaha wasakhda ah iyo in ay sameyso sii-waajinta maareynta biyaha duufaanta. Maalgelintan waa fursad weyn oo wax ku soo biirrinaysa dhaqaalaha, bulshada, iyo caafimaadka deegaanka ee gobolkeenna.

Gobolka waxaa horyaalla go'aamo u qaadanayo oo muhiim ah. Iyada oo ay jiraan mudnaano tayada biyaha ah oo degdeg ah, Degmada King waxaa ay u baahan tahay in ay cusbooneysiiso qorshaheeda biyaha wasakhda si aan u sameyno maalgelinta saxda ah waqtiga saxda ah.

Sidaa daraaddeed waxaan u baahanahay Qorshaha Biyaha Nadiifka ah

Waxaan doonaynaa in aan yeelano wadahadal gobolka ah oo ku saabsan doorka Degmad king ay mustaqbalka ku yeelanayso ilaalinta biyo-mareennada degaankeenna iyo caafimaadka. Waxaan wajahaynaa go'aamo – muhiim ah – balse qaali ah. Wadahadalka waxaa looga warbixin doonaa qorshaha Degmada King iyo agaasinka mustaqbalka ee ku saabsan arrimahan oo kale:

- Ilaalinta nidaamkeenna 50-sano jirka ah ee tuubooyinka biyaha wasakhda ah qaada, bambooyinka biyaha, iyo tas-hiilaadyadeenna daaweynta biyaha.
- Ka dhigidda tas-hiilaadyadeenna daaweynta kuwo adkeysi badan leh
- U adeegidda dadweyne sii badanaya

- Xataa sii yareynta xaddiga bulaacada ee aan la daaweyn iyo biyaha duufaanka ee wasakhda ah ee dul socda biyaha degaanka xilliyada duufaanta.
- Isbedelka cimilada oo keenaya dhacdooyin cimilo aad u daran
- Shuruudo cusub oo suurtagal ah in lagu soo rogo heerarka dheeraadka ah ee daaweynta biyaha wasakhda ah
- Helidda khayraadka laga helo biyaha wasakhda ah – sida adkaha nafaqada beeraha ah, tamarta, iyo biyaha dib loo warshadeeyo.
- Hubinta in dheefaha loo qaybiyo si loo siman yahay
- Sida loo maalgeliyo sii wanaajinta tayada biyaha

Dadku waxaa ay bixiyaan lacagta nidaamka biyaha wasakhda ah iyaga oo marsiinaya biilasha biyaha iyo korontada ee bil kasta. Sii wanaajinta tayada biyaha waxaa dheer, in dadku la wayddiisto in ay gacan ka geystaan maalgelinta dadaallada kale ee muhiimka ah ee gobolka – sida gaadiidka, waddooyinka, biyaha duufaanta, soo kabsashada kalluunka, iyo guryo la awoodi karo – iyada oo loo marayo qiimo kale, ujuurrooyin, iyo canshuuraha. Waxaa muhiim ah fahamidda sida isku-jirka kharashaadkan uu u saameeyo dadka maadaama gobolka uu qaali sii noqonayo.

Waxaan doonaynaa in aan maqalno fikrado iyo aaraa kala duwan

Qorshaha Biyaha Nadiifka ah waa fursad weyn oo wax ku soo biirrinaysa dhaqaalaha, bulshada, iyo caafimaadka deegaanka ee gobolkeenna. Qorshaha waxaa loo baahan yahay in uu muujiyo fikradaha kala duwan ee dadka ku nool halkan - dadka bixin doona kharashka qorshaha ee ku bixin doona biilasha biyaha iyo korontada.

Waxaa naga go'an geeddi-socod qorsheyn loo dhan yahay oo caddaalad ah. Si aan u sameyno sidan, waxaan hiigsaneynaa in aan burburinno caqabadaha sii wanaajinta iyo in aan dhageysano dhammaan noocyada dadka — oo ay ku jiraan ka-qaybgalayaasha muddada-dheer ka soo qaybgalayey wadahadallada tayada biyaha iyo dhinacyada daneynaya, ee cusub. Waxaan kala shaqeyn doonaa dadka tallaabo kastoo ka mid ah geeddi-socodka si aan u hubino in aan ku socono wadada saxda ah si aan u bixino natiijooyinka tayada biyaha, dhaqaalaha, bulshada, iyo caafimaadka ee ugu wanaagsan.

Wax badan ka oggow

Waxaan rajeynaynaa in adeegsiga jawaabcelintaada ay gacan naga siiso qaabeynta qorshaha. Waxaa naga go'an in aan idinla soo socodsiino wixii ku soo kordha inta uu socda geeddi-socodka qorsheynta waxaanna waqti hore idinla soo socodsiin doonaa fursad kasta si loo maqlo codkaaga.

Si aad isugu diiwaangeliso in aad hesho wixii cusub ee soo kordha mustaqbalka ama su'aalo ah, booqo www.kingcounty.gov/cleanwaterplan

Qaababka kale ee la heli karo
206-477-5371 / 711 (TTY Relay)

File: 1903_9527L_WTD-CWP_FactSht_SOMALI.docx